

SG.

SYSTEMS OF GRAZING
Booklet No. 9

MASHRUUCA HORUMARINTA DAAQA

GOBOLLADA DHEXE

BUUG YARAHA 9AAD

HABABKA DAAQA



DAREEMADA DHUL DAAQSINEEDKA

WAXAA LOOGU TALOGALAY SOMALIYA .

MASHRUUCA HORUMARINTA DAAQA GOBOLLADA DHEXE
BUUG YARAHAA 9 AAD.

HABABKA DAAQA

HORDHAC.

1. Hawlaha faraha badan oo loo adeegsado wax ka qabashada dhulalka daaqsinta sida: baahinta mashaariicda biyaha, samaynta xiritaan biyo-qabadyo kala duwan, iwm. waa looga waxtar roon yahay meelaha uu dhulka aad u ballaaran yahay. Xaddiyo dhul aad u yar baa lagu dabbaqi karaa xeeladahan. Haddaba, habka ugu habboon ee tanaadinta daaqa waa xadaynta xoolaha manaafacaadsanaya daaqsinta. Waayo, wuxuu habkani suurto galinayaa kobcinta xaddiyo dhul aad u ballaaran.

2. Wax badan baa la sheegay in dabeecaddu tahay bogsiiye wanaagsan. Waayo, haddii ay dabeecaddu kaashato waayaha aqooneed ee bani'aadamka, waxaa dhici karta in horumar ballaaran laga gaaro kordhinta iyo tanaadinta dhulka daaqsinta ah. Si haddaba barnaamijyada lagu horumarinayo daaqa u hirgalaan, waxaa lagama maarmaan noqonaysa in arrinta wax ka qabashadeeda laga abbaaro fahamsiinta xoola-dhaqatada danta iyo ujeeddada laga leeyahay mashaariicda horumarinta daaqa. Sababtoo ah miro-dhalinta barnaamijyada laga lama kulmayo dhibaato haddii xoola-dhaqatadu ka qayb qaataan, kana soo dhalaalaan kaalinta kaga aadan daryeelka daaqa.

3. Maqaal xiiso badan ee ku soo baxay Sibteember, 1978 Warsidaha Daaqa Soomaaliyeed cadadkiisii 6aad ee uu qoray C.C.Cilmi oo ka tirsan Kulliyadda Beeraha ee Jaamicadda Ummadda Soomaaliyeed wuxuu si cad tijaabo ugu muujiyey in dareemadu tahan ahaan u tanaado tiro iyo tayaba marka ay hesho waqti nasasho ah, waxayna tijaabadu xaqiiqowday kolkii la is barbardhigay dareemo muddo nasnayd iyo xaddiyo la jaray amminno kala duwan. Faraqa ka soo baxay labadoodu wuxuu caddeeyey in xaddiyada la jaray ay aad u tayo xumaadeen. Nasinta dhulka xilliyada roobabka ama waqtiyada ka dhaadheerba waxay leedahay waxtar u dhigma cawska oo jaridda laga daayo, hababka daaqana waxaa loogu talagalay in lagu dhiirigaliyo tanaadinta xididdada iyo tahan noqoshada nabaadka iyadoo laga duulayo bartilmaameedka ah nasinta xididdada iyo caleemaha dhirta. Nasintu waxay xididdada iyo caleemaha u yeeshaa xoog, waana geedka xoogga leh kan soo saara baadka badan oo manaafacaadka u leh xoolaha.

4. Dhirta oo yaraata ama gabi ahaanba baaba'da waxaa keena ku talaxtagga daaqa. Dabadeed, dhulka ayaa dhirtu ka idlaataa, isuna roga gabaahirig bannaan. Dhulka masiibadan nabaadguurku ku habsatay xoolo badan kuma dhaqmi karaan. Si haddaba dhibaatan wax looga qabto, waa in la sameeyo qorshe cilmiyeysan oo lagu nasinayo dhir badan oo farac wanaagsan si ay fursad ugu helaan soo saaridda iniinta, sidaa darteedna ugu tarmaan, una daboolaan dhulka.


DANAYNTA GUUD.

5. Maadaama uu taranka xooluhu ku xiran yahay dhaqaalaynta daaqa, waa in mudnaanta koowaad la siiyaa daaqa ee aan loo qaadan in xooluhu ka muhiimsan yihiin daaqa. Marka dulucda sidaas loo fahmo, laguna daro ficil dhab ah, waxaan shaki lahayn in tanaadidda daaqa waxtarkeedu u noqon doono xoolaha. Xusuusnow waligaa in daaqa yahay kan ka mudan xoolaha. In hababka daaqa looga hadlo buuggan waxaa keenay in laysku fahamssiyo in daryeelka daaqa uu yahay xil aan marnaba la dhayalsan karin, dhaqaalaha iyo taranka xooluhuna aysan marnaba suuroobayn haddan ugu horrayn loo diyaarin carshintii ay ku samatabixi lahaayeen. Habkee baa ugu habboon daaqa Soomaaliyeed ?.

HABABKA DAAQA

B. DAAQSIINTA FURAN EE DOORASHADA


6. Habkani waa kan ugu muhiimsan ee guud ahaan lagaga dhaqmo Waddanka Soomaaliyeed. Xoolo-dhaqatadu waxay hadba u guuraan meel alla meeshii daaqsin wacan ay ku arkaan, xulashada daaqsintuna waxay ku xiran tahay rabitaanka iyo barnaamijyada u degsan xoolo-dhaqatada maadaama uusan jirin sharci xaaraan-timaynaya in xooluhu daaqaan meelaha qaarkood. Waxay hadiyo jeer ka fakaraan waa helitaanka biyaha marka meel ay u guurayaan. Sida badan marka beeli hayaamayso waxaa tixgalin mudan tayada ceelka iyo carshinta ruunka cusub ee loo guurayo. Waxaa iyana meesha ku jira cimilada deegaanka iyo nooca xoolaha. Habkan waxaa loo adeegsan karaa meelaha xooluhu teelteelka yihiin, lehna baad badan iyo tigaad nooc walbaba ah ee ku filan xoolaha sannadka oo dhan. Waxaa hubaal ah si kastoo meelahaas daaqsinta ugu habboonaadaanba in daaqa qorshe xumo awgeed ku wiiqmayo. Waayo, waxaa dhiici karaysa in meelahaas carshinta wanaagsan lagu talaxtago dabadeedna dhirtu baaba'do. Meelaha noocaasa ee baadka iyo biyahaba u leh xoolaha aad baa loogu talaxtagaa, waxaana badanaa dhacda inay isu rogaan gabaahirig bannaan ama lama-degaanno.



HABKA DAAQSINTA FURN EE DOORASHADA (DHANKA MIDIG EE JAANTUSKA) WUXUU KEENI KARAA BAABA' KU DHACA CARRADA IYO NAFLEYDA DHIRTA. DHULKA XIRAN (DHANKA BIDIX EE JAANTUSKA) WUXUU DHALIN KARAA TANAADINTA BAADKA XOOLAHA.

•T HABKA XIRITAANKA DAAQA.

7. Habka xiritaanka daaqa waa habka saldhigga u ah dhammaan hababka lagu daryeelayo wax ka qabashada daaqsinta. Ruun ayaa la seereeyaa (laga xiraa daaqa xoolaha), waxaana la nasiyaa muddada u dhaxaysa bilowga koritaanka hore ee geedka ilaa uu koritaankiisu dhammaystirmo, iniinta ayaa dabadeed dhalata dabayaaqada xilliga koridda. Dhirtu dhamman way u wada baahan tahay nasasho si ay u soo saaraan naq. Waqtiga nasashadu waa inuu ugu yaraan 90 casho noqdaa waqtiyada roobabka ee dhirtu baxayso si ay u tarmaan, dhirta daaqsinta leh ee horay uga luntayna ay dib u soo baxdo. Meelaha sida ba'an loogu talax-tagay daaqsinta ee nabaadguurku waxyeeleeyey oo dhirtu wiigantay tiro iyo taya ahaanba waxaa laga yaabaa inay u baahdaan xiritaan waqti ka dheer 90 casho. Waxaa kaloo habboon in waddanka Soomaaliyeed gudihiisa laga sameeyo seere abaareedyo kayd ah oo la xiro waqtiyo aad u dhaadheer si loogu aayo waqtiyada ay abaaraha xumi waddanka ku dhufaan amaba ilaa iyo intay bilicdu dib ugu soo noqonayso meelahaas.




HABKA XIRITAANKA (SSERAYNTA) DAAQU WUXUU XIDIDDA DHIRTA AWOOD IYO WAQTIBA U SIIYAA INAY FIDAAN OO XOOG YEESHAN, DABADEED, WAXAA IYANA KORDHA CALEEMAHA, XOOLUHUNA WAXAY U AAYAAN DAAQSIN KA TANAADSAN TII AY AWAL KU QABEEN MEELAHAAS.

8. Daaqa tahanta noqda ee ka soo baxa ruunka seeraysan aad buu ugu wanaagsan yahay daaqidda. Ruunka muddada xirnaa lagama yaabo inuu keeno carshin xumo ku timaadda daaqa bal waxayba ka qaadaysaa tanaad iyo tigaad ku habboon daaqsinta. Dhirta engagan ee wali ku dhidban dhulka waxaa lagu tilmaamaa "balka taagan".

- 4 -


9. Geedo-yaryarka tayada xun meelaha ay ku badan yihiin haddii loo baahdo in laga takhaluso waxaa dhici karta in looga xilbeeli karo iyadoo 30 ilaa 45 casho si ba'an loo daajiyo xoolaha. Marka xeeshaan la adeegsado, ruunka waa in la xiraa, sida kor ku sharraxan, si dhirta daaqsinta wanaagsani u tanaadaan iyadoo waliba daajinta ku talaxtagga ahayd ee xoolaha ay hakinayso koridda dhir-yaryarta saaca xun.
10. Marka si wanaagsan loo dhaqangaliyo habka xiritaanka daaqa waxaa dhacaysa in dhirta daaqsinta fiicani ay u helaan fursad iyo awood ay ku shin dhammaystaan, kuna miro dhaliyaan. Dabdeed daaqa ka baxaya ruunka sidaas u xannaanaysan marna lagama yaabo inuu tayo xumaado. Arrintu si kasta ha ahaatee, haddii iyana lagu dhaqmo tabo kale oo lagu hormarinayo maamulka daaqsinta sida: ballaarinta mashaariicda biyaha, ganacsiga xoolaha iyo ka-hortagga bacaadka, waxay dhalanaysa in tayada carshinta oo qurihi ayan ku tanaadin, balse waxaaba dhacaysaba in tiro iyo taya ahaan ay wax weyni isku baddalayaan. Mar kale, waxaan oran karnaa dabeecaddu waa bogsiiye wanaagsan hase yeeshee, waxaa lagama maarmaan ah in dadku u oggolaado in dabeecaddu kaalinteed ka qaadata tanaadinta carshinta ee xooluhu manaafacaadsadaan oo la'aanteed noloshu diiq galayso.



HABKA XIRITAANKA DAAQA. MARKA HABKAAN LA DHAQANGALINAYO, WAXAA LA XIRAA RUUN BALLAARAN XILLIYADA ROOBABKA IYO KOLKA ROOBABKU DHAMMAADAANBA. RUUNKA XIRAN EE KA MUUQDA JAANTUSKU MA JIRO EE WAA MALA-AWAAL.


J. HABKA GEDGEDINTA. DAAQSINTA.

11. Marka habka gedgedinta daaqsinta lagu dhaqmayo, waxaa dhulka oo dhan ha ahaato degmo, beel ama tuulo, loo qaybiyaa raasas ballacyo is wada le'eg leh. Raasas sidaas loo qayb-qaybiyey, waxaa lagu magacaabaa goofaf. Tabta ugu fudud oo durba looga faa'iidayaan karaa waa raasas oo kiiba loo kala qaybsho labo goof oo midi xirnaado marka kan kale furan yahay. Waxaan laga maarmayn in goof walba ay biyo ku dhexyaalliin ama ku dhow yihiin agagaarka goofafka si hadba goofka xiran uu gabi ahaan u nasto inta kan kale ay xooluhu daaqayaan.



12. Habka ugu wanaagsan ee gedgedintu waa dhulka oo loo qaybsho afar goof ama wixii ka badan. Xoolaha oo dhan waxaa la daajiyaa hal goof markiiba, waxayna u wareegaan goofka ku xigo iyadoo loo eegayo waqtiga ama carshinta ku taal weli goofka ay xooluhu daaqayeen ama labadaba. Habkani waxaa looga danleeyahay in xoolaha aad iyo aad lagu uruuriyo hadbo goofka daaqsinta u furan, waxaana markaas lama huraan noqonaysa in dhanka biyaha laga haqabtiro goof walba. Faa'iidadada weyn oo uu leeyahay habkani waxaa weeye in dhulka badankiisa la xiro xilliyada roobabka iyadoo la seeraynayo waqtiyo kala duwan, waxaana taas dheer in goofafka midkood gabi ahaan xirnaado sidii aan ku soo sharraxnay (J), (habka xiritaanka daaqsinta).

13. Waxay u muuqataa suuragal in habka gedgedinta daaqsinta ee aan ka soo hadalnay uu ku wanaagsanaan karo beero iskaashato daaqsin xoolaad ama dhowr degmo oo xoolo dhaqato nagi ah. Waxaa haddaba qiimo weyn ku fadhiya guddiyo degmooyinkaas ka dhisan. Si ay daaqsinta xoolaheeda u horumariso, waxaa iyana habkaan raaci kara tuulo (beel xoolo dhaqato ah) iyadoo ku xisaabtamaysa soohdinta dhulka iyo xoolaha ay leedahayba.



XADAYNTA DAAQSINTA WAXAA

KU DHAQAALOoba XOOLAH.

X. HABKA GEDGEDDINTA XIRITAANKA DAAQSIINTA


14. Habkani wuxuu ka unkamaa isku dhafidda labada hab ee xiritaanka iyo gedgedinta daaqsinta, sida dhabtaana waa habka ugu wanaagsan wax ka qabashada dhulka daaqsinta ah ee xooluhu manaafacaadsadaan. Ka dib marka dhowr sano lagu dhaqmo habkan, waxaa kordhayo taranka xoolaha oo ay ugu wacan tahay horumarka tanaadidda daaqsinta.

15. Marka la dhaqangalinayo habkan waxaa lagama maarmaan ah in laga baaraandego xaddiga dhulka ah ee loo qaadanayo raaska si aan looguna murmin ama laysugu qabsanna raaska waa in laga soo saaraa isticmaalka daaqsinteed xuquuq qeexaysa hadba kooxaha xoolo dhaqatada ah ee raaskaas daaqsan kara xoolaha. Raaska waxaa loo qaybiyaa afar goof oo isle'eg iyadoo la tixgalinayo dhanka baaxadda iyo tayadaba ilaa intii suuragal ah. Xoolaha iyana isticmaalaya soonaha, waxaa daaqsintooda la isu raaciyaa saddex kooxood iyadoo koox walba qayb ahaan loogu aaddinayo daaqsinta ku taal hal goof; goofka afraad oo harayna dhammaan xoolaha waa laga xiraa.

16. Habku wuxuu ku shaqeeyaa meerto afar biloodle ah. Afar bilood kadib, ayaa koox ka mid ah kooxihii xooluhu u daaqsin wareegtaa goofkii marraa (waa kii afraad ee xirraa), goofkii ay ka soo guurtay kooxduna, wuxuu xirraadaa muddo afar bilood ah. Kooxda labaad ee xooluhu waxay iyana ku wareegtaa daaqsin ahaan afar bilood kadib goofkii nasnaa, sidaasaana qorshuhu u soconayaa. Meertada dhan ee daaqsintu waxay ku ebyamaysaa muddo 16 bilooda goof walba la daaqayo 12 bilood lana nasinayo muddo 4 bilood. Meertadii dhanba kadib, waxaa caddaan ah in goofafku nasanayaan waqtiyo kala duwan ee sannadka, afar sano kadib (3 meerto) goof walba wuxuu nasanayaa afar xilli ee sannadka. Habkani wuxuu dhulka fursad u siinayaa dhalashada nabaad tahan ah oo tigaad leh iyo helitaanka ay dhirtu helayso waxyaabaha lagama maarmaanka u ah koritaankooda.

- 7 -

17. Mar haddii xoolo dhaqatadu ay raaska daaqsinta oo dhan u isticmaalayaan habka gedgedinta nidaamka waa faqsan, markaa kooxaha xoola dhaqatadu midna kooxda kale kuma dhaleecayn karto in lagu joorfalay oo ay ka daaqsin wanaagsan tahay. Waayo waxaa goofafka xooluhu u daaqayaan meerto ahaan. Habka ku dhaqankiisa waxaa la diyaarin karaa waqti kasta oo sannadka gudihiisa ah, waxaase lagama maarmaan noqonaysa in hirgalintiisa la jaangooyo bilowga roobabka. Reerguuraaga xoola dhaqata ah ee ku soo kordha beesha, waxay u baahan yihiin in la siiyo daaqsinta ku taal goofafka midkood. Si haddaba maamulka beeshu u noqdo mid taabbogal ah, waxaan laga maarmayn in guddiyada beesha ay had iyo jeer yeeshaan wada tashi ay uga baaraandagaan hadba wixii dhibaata ah ee ka hor timaadda iyo siyaabaha ay ugu kaltamayaan carshinta ku taal raaska iyo hadba wixii ay ka yeeli lahaayeen reerguuraaga ku soo kordha.



MARKA LA
HORUMARINAYO
DHULA DAAQ-
SINTA AH,
WAXAA LAGAMA
MAARMAAN AH IN
DHAMMAAN Xoola-
DHAQATADU WADA
TASHADAAN, KUNA
HESHIYAAN
WIXII IYAGA
DANI UGU JIRTO
EE LAGU HAGAA-
JIN KARA DHULKA
DAAQSINTA AH.

KH HABKA HABOONAANTA XILLIGA.

18. Meelaha uu roobku ku yar yahay ee aan laysku hallayn karin waxaa dhici karta in lagu talagalo habka habboonaanta xilliga oo qura. Waxaa taas looga danleeyahay in meelahaas la xiro ilaa uu xilligu ka wanaagsanaado. Kadib marka ay roobabku da'aan, dhulkuna carshin yeesho, ayaa dhulkii xirnaa loo furi karaa xoolaha ilaa daaqsinta ku taali ay xooluhu ka idlaystaan (waase inaan lagu talaxtagin). Habkani isugu dhafan ku talagalka habboonaanta xilliga iyo xiritaanka dhulka daaqsintu wuxuu leeyahay faa'iidooyin dhowr ah :-

- b. Maaddaama uu dhulku seereysan yahay laguma talaxtagayo daaqsinta, xididdada geeduhuna ma baaba'ayaan xilliyada angegan ee aan roobabku jirin. Nasashada noocaasihi waxay dhulka iyo dhirtaba u noqonaysaa dhaqaale.
- t. Carshinta wanaagsane ka soo baxda goobaha seeraysan waxaa xoolaha loo furaa waqtiyada ku habboon daaqsinta iyadoo aad ugu manaafacaad badan xoolaha.
- j. Waxaa iyana habkan ka faa'iideysana goobaha kale ee xooluhu daaqa jireen oo iyana la xiro inta xooluhu ay daaqsin ugu maqan yihiin seerayaalkii dib loogu furay xilliyada roobabka. Sidaa darteed, ku dhaqanka habka habboonaanka xilligu wuxuu caawinayaa meelaha kale oo iyaguna fursad u helaya inay xirnaadaan waqtiyo dhaadheer oo xilliyada aaranka ah.
- x. Kabid marka si qiyaas leh ay xooluhu u daaqaan seerayaalka xiran, waxaa dhacaysa in dhir badan oo daaqsinta ku wanaagsan ay tanaadaan, taasina waxay hagaajinaysaa tayada daaqa xoolaha.

D. NOOCYADA XOOLAH.

19. Geela, lo'da, riyaha iyo iduhuba waxay leeyihiin adkeysin kala duwan xagga waqti nololeedka iyo tarankaba. Ilaa xad, baahidooda ceel iyo carshini waa kala duwan tahay, sidaas darteedna, waa laga gudbi lahaa dhibaata ka imaanaysa kala duwanaanta hababka loo dhaqo haddii ay xooluhu biyo ka helayaan goob walba oo daaqsin leh. Geelu wuxuu awood u leeyahay inuu ceel iyo carshinba u tago meelo aan lo'da gaari karin. Haddaba, waxaa habboon in madaxda xoola dhaqatadu aad uga baaraan-dagaan habka ugu wanaagsan ee looga faa'iideysan karo daaqa, xoolahooduna ugu dhaqaaloobi karaan. Xusuusnow in xannaanaynta iyo daryeelka dhulka daaqsintaahi ay leeyihiin mudnaanta kowaad, xoolaha noloshooduna ku xiran tahay tayada iyo tigaadda ay manaafacaadsadaan hadba daaqsinta ay helaan oo facba facba kale ka dhaxlayo.
20. Dhamaan hababka daaqa waxaa loogu talagalay in dhulka daaqsintu helo fursad nasasho waqtiyo kala duwan, gaar ahaan waqtiyada ay dhirtu kodho, iniintana soo saarayaan. Mar haddii ay dhirtu cunto ahaan ku xiran tahay ifka cadceedda marka caleenta xoogga iyo qirada lihi waxay door weyn ka qaadanaysaa u soo saaridda geedka cunto fara badan. Haddii xoola-dhaqatadu caawiyaan dabeecadda iyagoo iska ilaalinaya ku talaxtagga daaqa, kana hortagaya waxyaalaha dhaawaca u geysan kara dhulka, dabeecaddu iyana waxay xoolaha ka hagabtiraysaa daaq ay manaafacaadsadaan. Haddaba, arrintani waa dulucda looga golleeyahay wax ka qabashada dhulka daaqsinta ah. Waxaa waajiba in qof walba karaankiisa isugu geeyo sidii tanaadinta dhulka daaqsinta ahi u noqon lahayd mid aayatiin waara u yeelata xoolaha. Waxaa laga maarmayn in dhammaan wajiyada uu khusseyo daaqu ay wadajir isaga kaashadaan sidii ay hadba u xulan lahaayeen habka ugu wanaagsan ee wax loogu qaban karo dhulka daaqsinta Soomaaliyeed. Haddii ay dhacdo in dhibaato xallinteeda adan u babacdhigi karini kaa hortimaaddo, ama aad ka shakidaba wax ka qabashadeeda, waxaad la xiriiri kartaa madaxda ku hawlan cilmiga daaqa ee mashruuca horumarinta daaqa gobollada dhexe si ay kaaga qanciyaan sida ugu habboon ee loo waajihayo dhibaataada aad la kulanto.